
# Xaalufintu waa Xabaashii Noolaha

**Dhaxal la'aan ayaa jiilka dambe dhacarsan doonta. Sida dowladnimadii u luntay oo kale ayaa wax walba u lumeen oo deegaankii u burburay oo dhaqankiina u doorsoomay. Wax kastoo laga dhaxlay awooweyaashii hore oo ay ugu muhiimsan yihiin "deegaan barwaaqo iyo dhaqan suuban" Soomaalidu maanta waa ka salguurtay dhaxalkii awoowe, waxayna ka doorbiday inay deegaankeeda burburiso isla markaana ku milanto dhaqamada shisheeye. Sida la wada ogsoon yahay, Soomaalidu markey tagto waddamada Carabta waxay xirataa dharka Carabtu caanka ku tahay *"qamiis, cigaal, cimaamad iwm".* Markey tagto waddamada Yurub iyo Woqooyi Ameerika waxay xirataa dharka reer Galbeedku caanka ku yahay *"jeans, jaakad, qoorxir iwm"* xataa markey tagto Adis Ababa degdeg bey ugu milantaa Xabashida oo afka Amxaariga u barataa. Taariikhdii dunidu soo martey waxaa lagu xusay qowmiyado qarniyo ka hor jiri-jirey, balse waa-dambe dabargo'ay ama wixii ka haray ay ku milmeen ummado kale oo ay maanta hayb wadaag la yihiin. Sansaanka muuqdaa haddaan Alle samatabixin jiilka maanta ama Soomaalida cusub waxay u egtahay ummad jiritaankeedu lumi doono oo ku milmi doonta ummadaha kale, dalkuna wuxuu ku dambeyn doonaa dhul aan cidna lahayn oo aan la kala xigin *"no men's land."* Af iyo dhaqan, dad iyo duunyo, deegaan iyo dalbarwaaqo, wax walba waa la burburiyey oo qeyb la caymiyey haba yaraatee ma jirto. Burburka dhan walba kala degey**

**Somaalida maanta waxaa ugu xanuun badan:**



## Xaalufka & Nabaadguurka "Ecological disaster"

**Xaaraan cuneyaal baa dalkii xaalufiyee, Allow xoolaha iyo xoogba dhaafi. Waxba waxbaa ka darane, waxaa ugu daran, sida foosha xun ee loo burburiyey deegaanka bad iyo berriba. Soomaalidu weli kuma baraarugsana dhirta la gumaadayo inay tahay guuldarradii geyiga. Soomaalidu weli kuma baraarugsana dhibaatada laga dhaxli doono nabaadguurka iyo xaalufka. Sida muuqata Soomaaliya mustaqbal madow baa kusoo fool-leh. Bal aan si kooban u falanqeeyo muhiimadda deegaanka u leeyahay jiritaanka noolaha. Burburka deegaanka oo la ogsoon yahay inuu yahay baaba'a nafleyda, ayaandarro Soomaalidu inteeda badan 90% weli si habboon uma fahmin aayatiin xumada dhacarsan doonta jiilka mustaqbalka. Qarankii doonaya inuu ku tallaabsado barwaaqo iyo baraare waa inuu hormariyaa deegaanka iyo duunyada *"flora and fauna".* Hindiya waayadii hore waxay ahaan jirtey faqri faramaran, hase yeeshee 1960-yadii Hindiya waxay hirgelisay Kacaanka Cagaaran *"Green Revolution."* Horumarintii deegaanka iyo kordhintii wax-soo-saarka beeraha kadib, Hindiya hodon bey noqotay oo horumar laxaad leh bey ku tallaabsatay. Dadku wuxuu ku nool yahay nacfiga laga helo dhirta dhulka Eebbe ku beeray oo u qeybsan: dalagga beeraha laga goosto iyo uunta *"cad iyo caano"* laga helo xoolo tigaad soo daaqay. Jiritaanka nolosha *"hunguri-hoy-hu"* waxaa saldhig u ah geedaha oo xataa meeshii aan geedo lahayn roob kama da'o. Makiinado casri ah oo dhirtii lagu gumaaday ayaa la keenay, geedihii oo dhan dhuxul baa laga dhigay, dhulkiina wuxuu isu beddeley saxara lama degaan ah, xataa beerihii dhooboy bacad baa ku fiday oo mardhow dalag beereed lama goosan doono.**

**Qof kasta oo Soomaali ah haddii aad weydiiso, dhaqaalaha dalka maxaa tiirdhexaad u ah, jawaabta laysku raacsan yahay waa xoolaha nool. Haddaba haddii geedihii la gumaaday oo dhulkii saxara laga dhigay, maxaa xooluhu ku noolaan doonaan? Haddii kooxda loo yaqaan Tujaarul-Xarbi ay ku tartameen dhoofinta: dhuxusha, xoolaha dhadig, ugaadha iyo wax kastoo kayd iyo dhaxal u noqon lahaa jiilka dambe, mustaqbalka Soomaalidu muxuu ku dambeyn doonaa? Sansaanka muuqda haddaan Alle samatabixin 30ka sanee soo socda xoolaha Soomaalidu waa dabargo'i doonaan, maxaa yeelay geedihii ay daaqi lahaayeen dhuxul baa laga dhigay. Waxaa taas kasii daran geed-musiibo oo lagu magacaabo *"Geed Yuhuud ama kaligi nool"* ayaa gees-ka-gees geyiga Soomaaliyeed abuurkiisa lagu firdhiyey, qodax sun leh mooyee wax kaloo nacfi ah lagama helo. Geed Yuhuudka gobolladii lagu beeray taariikhiyan geedihii ka bixi jirey waa nabaadguureen, tusaale gobolka Hiiraan waxaa ka dabargo'ay geedkii Yicibka oo waxtarkiisa dhowr maahmaah laga allifey. Guud ahaan gobollada Soomaaliya waxaa laga isticmaalaa caana-boore, sugimeyn oo weligey kuma riyoon Matabaan-Garoore ayaa caana-boore laga isticmaali doonaa. Haddii xaaladu sidaan**

**kusii socoto mardhow waxaa la arki doonaa hilib Australia laga keenay oo Soomaaliya laga cunayo. Soomaaliya ayaandarro weyn ayaa ku habsatay oo bad iyo berriba waa la xaalufiyey, khayraadkii badda ku jirey ee Eebbe ku manneystay, maraakiib shisheeye "jiriif" ayaa boobtay *"reer ba'ow yaa ku leh".* Maraakiibta quwadaha shisheeye ee ku andacooda inay la dagaallamayaan Burcad-badeed waxay difaacaan oo u hiilliyaan maraakiibta xaalufisa baddeenna waxayna la mid yihiin *"col ku dhac oo tuugo kuu ciidamisay".* Gabyaa Cabdullaahi Cirro hees uu tiriyey beydadkeeda waxaa ka mid ah:**

**Haddii dhaxal awoowe dhumay,**
**Dhulkii laga dhigay saxara,**
**Dhirtiiyoo idil la gubey,**
**Dhuxul iyo laga dhigay duqaan,**
**Dhadiggii xoolaha la gaday,**
**Oo loo dhoofiyey qurbaha,**
**Ugaadhoo idil la dhacay,**
**Kalluunkii badda dhex yiil,**
**Shisheeyuhu ay dhurteen,**
**Dhaqankiyo laga tegay hiddaha,**
**Waxaan dhowrnaa dhegxumo,**
**Somaalaay goormaad is dhugan?**

**Ribanaye Allahayow Rijaalu-sebenka naga qabo. Sidoo kale rag mas'uuliyad sare sheeganaya ayaa *"Shuftada Caalamka"* u saxiixay in badda lagu shubo sun, berrigana lagu aaso haraadiga wasakhda warshadaha Nukliyeerka oo ah sun halis ku ah jiritaanka noolaha, taasina waxay keentay noolihii ku jirey badda maanta inay dabargo' ku dhow yihiin. Noolaha dabargo'ay ka sokow, haraadiga sunta *"waste toxic"* ee lagu firdhiyey geyiga Soomaaliya bad iyo berriba waxaa ka dhashay cudurro halis ah oo aan hore loo aqoon oo la cayn ah cudurradii laga helay Jabbaan kadib Bamkii lagu dhuftay Hiroshima. Shaqsiyaadkii dembiyada halista ah ka galay Soomaaliya "Madaxweyene ilaa Mooryaan" waxaa ugu khatarsan oo ugu dembi weyn raggii qandaraaska ku qaatay suntii lagu aasay geyiga Soomaaliya. Cabdi Muxumud oo habaaray kooxda loo yaqaan *"Rijaalu-Seben"* waa Tujaarul Xarbi iyo Hoggaamiye Kooxeed, wuxuu yiri:**

***Ilaahey dhub idin sii,***
***Dhulka idinla wada goo,***
***Dhallaan haddaad lahaydeen,***
***Idin dhaafe idilkood...***

**Waxa jira dhaqan guud oo aadamigu iska hidde-raacay oo ah waalidku inuu carruurtiisa uga tago dhaxal wanaagsan. Dhaxalka carruurta looga tago waxaa ugu muhimsan *"qiyam = values"* iyo kayd taariikheed farxad leh iyo deegaan barwaaqo oo nolol leh. Maanta waalidka Soomaaliyeed waxaa laga dhaxlay oo ay ubadkooda uga tageen: "taariikh madow, deegaan burburay bad iyo berriba ee jiilka maanta nool ma garwaaqsan yihiin guuldarrada iyo aaya-xumada ubadkoodu ka dhaxli doonaan? Soomaalida maanta ma garashadii baa ka luntay? Soomaalida maanta xagee bey ku**

**socotaa? Soomaalida maanta ma waxay ku talogashay inay dalkeeda ka guurto oo dhammaan qaxooti noqoto? Soomaalida maanta waxay la mid tahay nin geed koray oo laantii uu ku taagnaa salka ka jaray.**




## <u>Sunta Cagaaran:</u>

**Qaad sun leh iyo qori rasaas leh ayaa qarankii rogee Qaadirow ka qabo. Bartamihii qarnigii 19aad Shiinaha oo dhaqaalihiisu sarreeyo oo dibedda u dhoofiya *"shaah, xariir & maacuun"* ayaa reer Galbeedku u fekeray tabtii dhaqaalaha Shiinaha loo cuuryaamin lahaa. Kadibna reer Galbeedku waxay dalka Shiinaha ku qarqiyeen oo ka haqabtireen daroogo khatar ah. Shacabka Shiinaha oo qabatimay daroogadii, 70% waxay noqdeen daroogiste derbiyada jiifa oo aan waxbarasho iyo shaqo midna tahli karin. Si loo samatabixiyo shacabka sumeysan, dowladii Shiinuhu waxay soo saartay xeer lagu joojiyey soo-dejinta iyo isticmaalka daroogada, hase yeeshee waxaa diiday reer Galbeedka, dabadeed Ingiriiska iyo Faransiisku waxay Shiinaha ku qaadeen dalkii loo yiqiin *"opium war"* ee socday 1839-42 & 1856-60, ayaandarro Shiinaha oo tayada**

**hubkiisu hooseysay dagaalkii waa looga adkaaday, waxaana laga saxiixay inuu ka noqdo xeerkii joojinta daroogada.**


**Kenya iyo Xabashida oo gumeystihii Ingiriisku u hibeeyey dal iyo dad Soomaaliyeed, si Soomaalida loo sumeeyo waxay ka haqabtireen sun cagaaran oo lagu magacaabay QAAD, qowmiyadda Soomaalidu miyi iyo magaalo meel kastoo ay ku nooshahay 50% waxay si ba'an u qabatintay *"drug addicted"* raamsiga qaadka oo qof-qoys ilaa qaran Soomaali rogay oo khayrkeed ka reebay. Sannadkii 2010 dowlada Kenya waxay sheegtay inay waddamada: "Soomaaliya, Jabuuti, Yaman, Holland & Ingiriiska" u dhoofisay 200-tan oo qaad ah, kasoo qiimahiisu ahaa $250 million (arag www.news24.com/africa/features). Sidoo kale Itoobiya waxay sheegtay inay waddamada: "Soomaaliya, Jabuuti & Yaman" u dhoofisay 22,390-tan oo qaad ah oo qiimahiisu ahaa $108.3 million (arag www.ethiopianreview.com/content/3595).**

**Sida la ogsoon yahay Soomaalida iyo Yamanta kaliya ayaa qaadka raamsata oo xataa shacabka Kenya iyo Itoobiya ma cunaan qaadka. Maadaam gobolka Ticis ee Yaman qaad baa ka baxo, qiyaastu waxay u egtahay qaadkii Itoobiya iyo Kenya ay dibedda u dhoofiyeen in Yamaniyiintu ka istcmaaleeen 30% oo qiimahiisa lagu qiyaasi karo $110 million, inta kale oo qiime ahaan dhan $248 million in laga gaday qowmiyada Soomaalida meel kastoo ay dunida ka joogtoba. Lacagtaas marka lagu daro waxyaabaha iyo adeega raaci kara sida (kirada gaadiidka kala daabula, sigaar, shaah, kirada goobha lagu gado ama lagu raamsado, nadaafadda goobaha iwm) qiyaastu waxay tahay qowmiyadda Soomaalidu sanad kasta inay suntan cagaaran ee qaadka ku bixiso lacaga dhan $300 million. Qaadku waa khatar weyn, qof-qoys ilaa qaran khasaare laxaad leh ayuu gaarsiiyey, Soomaaliya waxay noqotay *"narcotic state".* Khasaaraha qofka uu gaarsiiyo waxaa ugu daran: caafimaaddarro, mashqeystenimo, tuugsi, qandho joogto ah oo lagu magacaabo qaadiro subax. Seddaxda nolosha daruuri u ah ayuu dadka ka rafacaa "risaqa la cuno, hurdo riyo leh iyo galmo raaxo leh". Qofka qaadka raamsada seddax marxaladood ayuu u dhexeeyaa "xaraarad, marqaan iyo dubaab = duhurkii waa doondoonaa oo waa xaraaradeysan yahay, galabtiina waa raamsanayaa oo waa marqaansan yahay, habeenkiina qaraw buu ku jiraa oo dubaab baa daba ka gala". Sababta ugu weyn ee qoysku ku burburo waa suntan qooshan ee qaadka, maxaa yeelay aabbihii ayaa masruufkii caruurta qaad ku raamsaday. *Qaad raamsade ubad qaday dan kama galo*. Qaadku waa dhibaatada ugu weyn ee dowladnimadii burburisay. Madaxdii sare ee dowladu hantidii qaranka ayey xadeen si**

**ay qaad u raamsadaan isla markaana u helaan qol dugsoon iyo gabadh qaawan oo qaxwaha shubta. Askartii iyo shaqaalihii hoose waxay si bahalnimo ah u boobeen dadweynaha si ay qaad u raamsadaan. Tiro yar mooyee sida loo badan yahay dadka qaadka raamsada kali-kali uma fariistaan oo waxaa marqaanku ku baxaa lamaane aan is qabin, dabadeedna marka lays xoodaamiyo xishoodka ayaa xakamaha goosta, halkaasna fisqi iyo foolxumo ayaa ka dhalata.**

**Dagaalkii "opium war" kadib reer Galbeedku daroogadii ay dadweynaha Shiinaha ka haqabtireen waxay ka dhigtay shacab nolosha ka dhacay, fisqi iyo foolxumo ayaa guri kasta gaartey. Guuldarradii daroogadu waxay Shiinaha u soo jiiday naaneys xun, yasitaan iyo in la liido, halkudhugyagdii lagu naaneysay waxaa ka mid ah hoyga dhilleysiga iyo daroogada *"home of drugs and prostitute".* Kacaankii Shiinaha ka hanaqaaday 1949 ayaa naaneystii xumayd tirtiray. Hoggaamiyihii weynaa halyey *Mao Testung* wuxuu dalka ka joojiyey keenista iyo isticmaalka daroogada, isla markaana wuxuu amray in safmar iyo aragti loo toogto Shiineys kastoo isticmaala daroogo. *Mao Testung* wuxuu ku guuleystay inuu dib u soo nooleeyo sharaftii iyo karaamadii Shiinaha, shacabkiina noqdo dad nadiifa ah oo shaqeysta. Haddaba si sharaftii iyo haybadii dib loogu soo celiyo, maanta Soomaaliya waxay u baahan tahay hoggaamiye mayal adag oo la ayni ah *Mao Testung* oo marka hore dalka ka joojiya suntan cagaaran, kadibna si naxariis la'aan ah oo safmar iyo aragti u laaya dadka isticmaala nooc kastoo daroogo ah.**



## Dawarsi & dhaqan doorsoon:


**Deegaanka bad iyo berriba la xaalufiyey iyo suntan cagaaran ka sokow, seben xumaadka fowdada iyo dowlad la'aanta waxyeello baaxadweyn oo aan kasoo kabasho lahayn ayaa gaartey Soomaaliya "af iyo dhaqanba". Taariikhiyan Soomaalidu waxay ahaan jirtey dad qabweyn oo diida quursi iyo qabbaannimo. Waxay ahaan jirtey dad isla sareeya oo diintooda iyo dhaqankooda ku faana. 1980-yadii ka hor haddii gabadh Soomaaliyeed ay guursato nin-cad waxaa la oran jirey heblaayo Gaal bey u fuushaa oo waa geyaan seegtay. Shacabka oo ku dhegan diinta iyo dhaqanka darteed waxaa la aaminsanaa Gaalka cad inuu yahay Saancaddaale aan gabadh Soomaaliyeed geyaan u ahayn. Ayaandarro qabkaasi maanta waa lumay oo haweenkii Soomaaliyeed waxay noqdeen beylaha habardugaag iyo haadba u nugul, waxaana lagu naaneysay *"hot cake … cheap and clean".* Dhaqan doorsoonka dhacay waxaa ugu xanuun badan qowmiyadda Soomaaliyeed oo maanta inteeda badan ku nool dawarsi iyo darxumo aan Alle ku kallifin.**

**Maahmaahdii ahayd *"nin seefi qaaday waxaa ka xun nin soori qaaday"* maanta waxaa lagu beddelay *"tuugsi baa tacab ka fiican oo waa lagu taajiraa".* Soomaalida maanta qiimeyntii qarankeeda qaxooti bey ku doorsatay, tacabkii dalkeedana tuugsi bey ku doorsatay. Bal si dhugmo leh u dhuux seddaxdaan tusaale:**

- **Horraantii 2007 gulufkii ciidanka Xabashidu ku qaaday koofurta Soomaaliya, dagaalkii ka qarxay xaafadaha Xamar-Jadiid ee woqooyi Xamar dad baa ka qaxay, barakaceyaashiina waxay degeen Ceelasha Biyaha. Hay'adda WFP oo malaha sida muuqata seddax xaraf u taagan yihiin *"WFB = wakaaladda fidinta baahida"* ayaa barakaceyaashii u qeybisay raashin tayo xun. Dad ladan oo ku noolaa xaafado aan dagaalku gaarin ayaa goobihii loo barakacay ka dhistay guryo lagu magacaabay *"Buush-Bariis"* maalinta raashinka la qeybinayo habeenkeeda ayaa carruurta la geeyaa oo subaxii ayaa dabka canjeelada la shidaa, dabadeedna WFP laga qaataa xoogaa sandareerto ah. Nin baa ku gabyey *"Barre Bokaasiyo waxaan ogaa Boqorki Iiraane, barwaaqada la caasiyo Ilaah waa burburiyaa".* Laba sano goortii la qaadanayey xoogaa raashin ah, 2009 Kooxda Shabaab ayaa Xamar oo dhan dabgelisay oo meel kasta dagaal ka qarxisay, dadkii shalay "Buush-Bariiska" beenta ah dhistay si dhab ah ayey u barakaceen oo waxay degeen Buush aan Bariis lahayn, sababtoo ah WFP Shabaab ayaa dalka ka eryey.**
- **Burburkii Soomaaliya ku dhacay wuxuu ahaa baraaraha "Nairobi, Kampala, Adis Ababa iyo Jabuuti". Xaafadda Islii ee Nairobi waxay noqotay *"Gateway of Somalia."* Soomaali tirodhaaftay ayaa degtay "kii ganacsi rabay, kii dhoof rabay, kii dhaqtar rabay, kii NGO watay, kii xil rabay ee doonayey inuu mushahaar ka**

**qaato UNDP, kii doonayey inuu xog u gudbiyo Mukhabaraadka Caalamka, waxaa xarun labaad u noqotay Nairobi". Ganacsi ballaaran ayaa Soomaalidu Nairobi ka yagleeshay, haddana waxaa Nairobi ku badan dhallinyaro hablo iyo wiilal isugu jira oo meheradoodu tahay tuugsi. Goobaha ganacsiga Soomaalida waxaa ka shaqeeya dad Afrikaan ah, dhallinyarada Soomaaliduna waa dawarsadaan, arrintaas feker bey igu riday, dabadeedna waxaan u tegay ganacsato leh "hotello, maqaayado iyo dukaamo" waxaan weydiiyey sababta dhallinyarada Soomaalida loo shaqaaleyn waayey? Jawaab kooban ayaa lay siiyey oo waxaa laygu yiri, qof aamin ah oo shaqo raba bal adiguba keen. Dhallinyaradii dawarsaneysay ayaan qaar ka mid ah ku iri waxaan idiin hayaa shaqo, balse way diideen oo waxay yiraahdeen tuugsiga ayaa ka dhaqaale badan oo ka dhib yar shaqada. Gabadh dawarsaneysa ayaan ku iri waxaan ku hayaa haweeney laba carruur ah Yurub kala soo guurtey oo dooneysa gabadh carruurta u haysa oo ay siiso $100 bishii ee ma kuu geeyaa, waxay iigu jawaabtay ka badan baan tuugsi ku helaa ee nabadgelyo.**

- **Qurbejoogta Soomaalida ee degtay Yurub iyo Woqooyiga Ameerika, inta badan carruurtoodii waxbarashadii waa ka saaqideen oo waxay galeen xabsiyada. Sababta keentay arrintaas ayaan u kuurgalay, dhibaatadaasi waxay ka dhalatay dhowr arrimood oo isbiirsday, balse tan ugu weyn waxay tahay "tuugsi iyo been laysku lamaaniyey". Lamaanaha isqaba si ay ku helaan laba *"welfare/caydh"* waxay ku andacoodaan waan kala dudnay *"seperation"* ama waan is-furnay oo laba xaafadood ayey kala degaan. Gaalada oo markii horeba dooneysa in la dumiyo qoysaska islaamka, hooyadii laga duday ama la furay lacagta ayaa loo kordhiyaa oo waxaa lagu magacaabaa *"single mother"* xilkii aabbe iyo kii hooyoba dusha u ridatay. Saqda dhexe saamaleylka markii ay kulmaan ninkii ay sheegtay inuu furay dabadeedna uureysato iyadoo xijaab iyo indhashareer leh ayey xafiiska *"welfare"* tagtaa oo tiraah "boy friend" ayaa i uureeyey. *"Subxaanallaah, Rabbaa risaqa bixiyee sidee baa haweeney muslim ahi ugu dhiiratay boy-friend baa i uureeyey".* Xadiis baa leh "furiin iyo nikaax" ciyaar ma galaan. Taarikhiyan erayga "xila-fur" wuxuu ahaan jirey dhaarta ugu dambeysa ee rag lagu aamino. Waan is furnay looga golleeyahay in lacag yar lagu helo iyo *"boy friend"* baa i uureeyey waa dembi culus iyo ceeb iyo dhegxumo liddi ku ah diinta islaamka iyo dhaqankii suubanaa ee Soomaalida lagu yiqiin. Ciqaab Eebbe oo beentaas ka dhalatay iyo labadii waalid ee carruurta tarabiyeyn lahaa oo laba xaafadood kala degay, waxay keentay in carruurtii noqdaan dugaag iyo dibjir xabsiyada ku dambeeya. Sideedaba hooyo kaliya carruur ma edbin karto siiba wiilasha markey gaaraan *"teen-age".* 1980-yadii kadib dhaqan doorsoonka dhacay si weyn buu u gilgilay qowmiyadda Soomaalida gudaha iyo dibeddaba.**







## Afka hooyo waa hodon

**Sannadihii burburka wadaaddo "gardheer iyo surweel gaaban" leh oo hab xisbi u abaabulan ayaa la wareegay ganacsiga iyo hawlaha adeegga bulshada, waxay mudnaanta koowaad siiyeen hormarinta afka Carabiga iyo tirtirista afka Soomaaliga, fekradaas waa ku guuleysteen oo Soomaaliya waxay noqotay Maxmiyad Carbeed iyo Mustacarab la dhalanrogay. Gaar ahaan dugsiyada waxbarashda iyo goob kastoo gacanta wadaadada ku jirtey waxaa loo bixiyey magac laga soo waariday Jasiiradda Carabta, dabadeed waxaa soo ifbaxay magacyo Carbeed ay ka mid yihiin: *"Abu Quteyba, Abu Mansuur, Abu Mascood, Abu Dalxa, Abu Maxamed, Abu Muxsin, Abu Ayuub, Abu Dujana, Abu Subeyr, Abu Ridwaan, Abu Salma, Abu Seynab iyo kuwo kaloo tiro dhaafay"*. Xafiisyada wadaadadu maamulaan hawl maalmeedku wuxuu ku socdaa af Carabi aan eray Soomaali ah ku jirin, waxaad maqleysaa erayadaan. *"Ustaad malafkaan u gee Amiir hebel oo fadhiya Maktabka Shuurada ama Qismu Tanfiid"* iyo wixii la mid ah.**

**Dugsiyada wadaadadu maamulaan lagama soo dhoweeyo oo si dadban baa loogu diidaa inay waxbarasho ka helaan ardayda wadata magacyadii hore ee cuskanaa dhaqanka Soomaalida sida "wiilasha = Guuleed, Suudi, Warfaa, Rooble, Geeddi iwm, gabdhaha = Suuban, Sareedo, Cawrala, Cambaro, Shaqlan iwm". Kumanyaalkii magac ee taariikhiyan Soomaalidu la bixi jirtey daaqada dambe ayaa laga tuuray oo magacii raggu wuxuu kusoo uruuray 90 magac kaliya "30 macnahoodu yahay addoon sifo**

**Eebbe lagu daray sida "Cabdi+Raxmaan iyo Cabdi+llaahi" iyo 20 lagasoo minguuriyey ambiyadii Alle Qur'aanka ku xusay iyo 40 lagasoo minguuriyey magacyada Carbeed". Sidoo kale magacii haweenku wuxuu kusoo uruuray wax ka yar 30 magac sida "Sundus, Sumaya, Sacdiya, Farxiya, Fowsiya, Nimco, Salma, Najmo, Muna iwm". Qowmiyadda Soomaalida meel kasta ha joogtee bal aan ku qiyaasno 30 malyan, soddonkaas malyan maanta waxaa ka dhexeeya 120 magac kaliya. Haddaan Alle samatabixin, af Soomaaligii hodonka ahaa maanta wuxuu qarka u saaran yahay geeri iyo god aakhiro.**

**Eraybixinta Teknaloojiyada oo af Soomaaligu ku liito mooyee, xeeldheereyaasha afafku *"linguist"* waxay qireen af Soomaaligu inuu ka mid yahay luqadaha ugu hodonsan afafka adduunweynaha looga hadlo, bal aan 3 tusaale ka bixiyo:**

- **Af Ingiriis haweenta la qabo waxaa loo yaqaan hal magac kaliya "wife" balse af Soomaaliga waxaa loo yaqaan ilaa 13 magac "afo, arad, oori, xilo, marwo, maranti, bilcaan, daalli, maakhiido, xaas, bilcaan, naayaa, geesaxir, u-dhaxday iyo magacyo kale".**

- **Af Ingiriiska caanaha waxaa loo yaqaan laba magac kaliya "milk iyo yoghurt" laakiin af Soomaaliga waxaa loo yaqaan 15 magac waxaa ka mid ah "caano, dhaay, mac, manyac, suusac, karuur, garoor, aydaq, ciir, caanooyo, dano, bararis, buqbuqood, kasoofeen, faar, wan iyo magacyo kale"**
- **Af Ingiriis halaqa xamaaratada ah waxaa loo yaqaan "reptiles" waxaa loo kala saaraa 3 magac "snake, serpent iyo cobra" laakiin af Soomaaliga magacyada loo yaqaan halaqa lama soo koobi karo waxaa ka mid ah: "mas-cadde, mas-ciideed, mas-johaar, abeeso, carra-tahan, abeeso-lugaley, abris, seyle, good, mar-soo-bax, jilbis, goodaado, subxaanyo, jibiso, harrey, dhaji iyo magacyo kale"**

**Deegaanka burburay iyo dhaqan doorsoonka dhacay ka sokow, Soomaalida maanta afafka qalaad waxaa loo arkay ilbaxnimo iyo hormar, afka Soomaaligana waxaa loo arkay luqad jaahil iyo dib-u-dhac mudan in laga rugdoorsado. Tusaale, Soomaalida sheegata aqoonyahannada waxay barteen erayo dhihida iyo dhawaqu is-khilaafsan yahay sida: *"pharmacy enough therefore these".* Erayadaas waxaa loogu dhawaaqaa "F iyo D" balse "F" waxaa loo qoraa "ph + gh" sidoo kale "D" waxaa loo qoraa "th". Wargeysyada iyo Websiteyada Soomaalida rag aqoonyahan sheegta ayaa maqaallo ku qora, markey afka Ingiriiska qorayaan si saxan bey wax u qoraan, balse markey af Soomaaliga qorayaan way ku adag tahay inay si saxan u qoraan shibbanaha labanlaama *"MNLGRDB"* iyo xarfaha waaweyn *"capital letters"* ee sadarka ama magaca gaar ahaaneed laga billaabo. Cajiib! Waa qof afkiisii iyo dhaqankiisii liidaya.**

**Soomaalida maanta dhaqan iyo dalba waa ka dhaqaajisay oo dhismaha dalkeeda waxay ka doorbiday qaxooti, dhaqankii iyo afkii hooyo waxay ka doorbiday dhaqan shisheeye iyo af qalaad. Murti baa leh, "aafo ku asiibtay hadday maalka kaa lumiso waxba kaama lumin balse hadday dhaqanka wanaagsan *"values"* kaa lumiso wax**

**walba way kaa lumeen" Soomaalida maanta waa inay arrintaas garwaaqsataa. Gabyaa M. W. Tabantaabo wuxuu yiri:**

***"Ummadi dhaqan gaara iyo,***
***Diinteedey ku dhaadatiyo,***
***Dhawaq laysku af-gartiyo,***
***Dhul bay wada yeelataa,***
***Taariikhduna waa mid dhigan,***
***Dhambaalley aruurisaa,***
***Dhacdiyo mid la dhowrayaba,***
***Waxay qarannimo dhuntaa,***
***Markii dhaqan laga qulqulo***

**Abwaan Maxamed Cali Kaariye isana wuxuu yiri:**

***"Shanta qaaradood ee camiran uunka ku caweeya,***
***Caddaan iyo Madow uumiyahas caynba yahay caynka,***
***Qolo waliba dhaqan la cuskadoo caaney leedahaye,***
***Curdankiyo barbaartii kacday keenna caasiya'e***
***Ka caraabe sidii geel cusbiyo ceel dhanaan raba'e***
***Dhallinyarada caadadii Allahayow noogu soo celi"***

**Aqoonyahan sheegatada afka qalaad xurmeeya ee afka Soomaaliga liida ka sokow, dadweynaha ayaa erayada qaar si qaldan u isticmaala. Af Soomaaligu maanta waa agoon aan aabbe lahayn, waayo dalka kama jirto dowlad u heellan daryeelkiisa iyo difaaciisa haddiiba loo gefo oo si qaldan loo adeegsado. Erayada sida qaldan loo isticmaalo, bal aan laba tusaale ka bixiyo "hebel gabadhiisa iyo hebel wuxuu qabaa"**

**Woqooyi: Sidey aniga ila tahay reer Woqooyi adeegsiga af Soomaaliga waa kaga horreyaan reer Koofur, balse waxaa jira dhowr eray oo ay ku qaldan yihiin, waxaa laga xusi karaa naag la qabo oo carruur dhashay ayey leeyihiin hebel gabadhiisa. Ooridu hadday gabadh u tahay saygey u dhaxday, inantii ay isu dhaleenna maxay noqon? Magaca guud ee haweenku wuxuu u kala baxaa seddax *"Gabadh, Gambooley iyo Geesa-xir"* oo macnahu yahay inta timaha tidcan oo aan weli meher ku dhicin waa gabadh, inta meher ku dhacay ee shaash loo saaray waa gambooley iyo inta mehersan balse aan lala aqal gelin waa geesa-xir oo nin bey u geesa xiran tahay.**

**1980-yadii sarkaal reer Koofur ah oo Hargeysa ka shaqeeya ayaa gabadhiisa oo jaamacad ka dhigata Xamar waxay dooneysay inay imtixaamka qalin jebinta *"thesis*/disertation*"* wax ka qorto goobaha caanka ah ee Woqooyi ku yaal. Sarkaal Boorame joogay ayuu la xiriiray wuxuuna ka codsaday gabadhiisa oo Xamar ka timid iyo isaga in martigelin loo sameeyo, sarkaalkii *"XDS Gaas 1aad Boorame"* joogayna codsigaas waa aqbalay. Goobaha taariikhiga ah ayaa gabadhii lagu soo wareejiyey, goortii habeenkii la gaarey sarkaalkii reer Woqooyi ee Boorame joogay wuxuu u diyaariyey qol loo sharrxay hab aroos. Sarkaalkii reer Koofur wuxuu ku yiri, walaal aniga iyo gabadhu xagee baan kala seexaneynaa? Sarkaalkii reer Woqooyina wuxuu ugu jawaabay *"dee sow gabadhaadii maaha maad baalgashid".* Afgaranwaagaasi weli waa taagan yahay, waxaana ku qaldan reer Woqooyi oo naag meher ku dhacay oo carruur dhashay bey gabadh ku sheegayaan.**

**Koofur: Reer Koofur deegaanka Hiiraan Galbeed ka ah waxaa halhays u ah hebel wuxuu qabaa lo' tiro badan, hebel wuxuu qabaa beeso tiro badan. Sida qaalibka ah erayga qabis waxaa loo isticmaalaa say iyo oori isu dhaxay. Naxwe ahaan eraygu wuxuu ku saxan yahay hebel wuxuu qabaa heblaayo ama heblaayo waxaa qaba hebel ee lo' iyo lacag toona lama qabo. 1960-yadii midnimadii Woqooyi iyo Koofur, sheeko dhacday waxay leedahay askeri Koofur laga beddelay ayaa galay dukaan ku yaal Hargeysa, wuxuuna ninkii dukaanka iibinaayey ku yiri "*Xaaji Xalwo ma qabtaa?* Dukaan iibiyaha oo xaaskiisa lagu magacaabo Xalwo ayaa ku jawaabay haa waan qabaa. Askerigii inta lacag miiska saaray ayuu ku yiri keen-hee. Dukaan iibiyihii ayaa yiri haddaan keeno maxaad ku sameyn? Askerigii wuxuu yiri waan cunayaa oo waan jecelahay. Dukaan iibiyihii ayaa yiri oo ma horaad u cuni jirtey? Askerigii wuxuu yiri hore baan u cuni jirey oo Xamarba macmacaankeeda waan ku muudmuudsan jirey ee keen-hee. Dukaan iibiyihii oo xaaskisa Xalwo bil ka hor Xamar kasoo laabatay ayaa maseyr dareemay oo madax xanuun ku dhacay.**

**Soomaalidu markey qoreyso ama ku hadleyso afafka qalaad xil weyn bey iska saartaa oo waxaa lagu dadaalaa in si hufan loo hubiyo isticmaalka erayada, balse waxaa ayaandarro ah haba yaraatee inaan xil layska saarin saxitaanka afka Soomaaliga oo mudan in loo hiilliyo oo weliba in la hormariyo ay tahay waajib iyo lama huraan aan laga baaqsan karin.**






## Gunaanad

**Guntii iyo gabagabdii burburka deegaanka ku dhacay iyo dhaqan doorsoonka dalka ku baahay nolosha Soomaalida, waxaa looga hortegi karaa in la helo maamul iyo nidaam dadweynuhu ku kalsoon yahay oo dib usoo celiya nabadgelyadii iyo hay'adihii adeegga bulshada. Waxaa kaloo lagama maarmaan ah in la joogteeyo ol-ole ku wajahan waxtarka iyo muhiimadda badbaadinta deegaanka iyo dhowrista iyo ku faainista hidde dhaqanka soo jireenka ah ee Soomaalidu leedahay. Raqba waa ku raggeeda. Aqoonyahannada, suungaanleyda iyo qoreyaasha maanta nool waxaa saaran xil weyn**

**oo berrito la weydiin doono. Sidaas awgeed waa inay hirgeliyaan halkudheg hadafkiisu yahay Soomaaliyeey "Xaalufinta deegaanku waa xabaashii noolaha. Deegaankoo la badbaadsho waa dantii ummaddeenna. Soomaaliyeey dhaqankoo la dhowro waa dhaxalkii ubadkeenna *"back to basic values.* Intaad tuugsan lahayd Rabbi ku tiirso turuqana maal. Ha tahriibine dhulka tabcoo tiigso khayrkaa. Xumaanta dhaaf oo xirfad baro". Ugu dambeystii waxaan ku dardaarmayaa Soomaali kasta oo damiir wanaagsan leh inuu kaalin firfircoon ka qaato sidii loo horjoogsan lahaa seddax kala daran oo kala ah: waxyeelleynta deegaanka iyo walaahowga tuugsiga iyo waabayda jaadka oo runtii ah seddax cadow oo Soomaali qayrkeed ka reebay. Qoraalkan waxaan kusoo afjarayaa hambalyo iyo mahadnaq aan u jeedinaayo Mudane Ismaacil Cumar Geelle madaxwaynaha Jabuuti oo qabanqaabiyey isla markaana maalgeliyey dhowr kulan oo loogu talogalay uruurinta suugaanta abwaannada Soomaliyeed meel kasta ha joogeene.        Wa- Billaahi Towfiiq**

**Abdulkadir Osman "Aroma"**
**shirwac55@hotmail.com**